



Isnadaamiska

Waalidka ama Masuulka Qaaliga ahoow,

Waxaa laguu siinayaa xaashidan xogeed:

- Sababtoo ah adiga ama canugaada ayaa laga yaabaa in uu idin haleelay isnadaamiska.**
 - Ujeeddooyin macluumaad oo keliya.**
-

Xogta Guud Ee Ku Saabsan Isnadaamiska?

Waa maxay Isnadaamisku?

- Isnadaamisku waa infekshanka cayayaan yaryar, oo la yiraahdo injir, oo gala maqaarka qofka.
- Injirta naagta ah ayaa qoda maqaarka, ayadoo maqaarka ka samaynaysa duleel la yiraahdo "burrows" halkaas oo ay ku dhasho ugxmaxaha.
- Injirtu si degdeg ah ayay ugu faafتا dadka meelaha ay dadku ku badan yihiin meelahaas oo isku taabashada maqaarka ay ku badan tahay, sida dugsiyada iyo xarumaha daryeelka carruurta.
- Injirta ayaa ku noolaan karta bii'ada, ka baxsan maqaarka dadka, muddo ilaa 2 ama 3 maalmood ah.

Yuu ku dhici karaa isnadaamisku?

- Qof kasta ayuu ku dhici karaa isnadaamisku. Waa wax caadi ku ah aduunyada oo dhan wuxuuna ku dhacaa dhammaan isirada iyo heerarka kala duwan ee bulshada.
- Kooxaha qaar waxay khatar weyn ugu jiraan inay aad ula xanuunsadaan ama inay isku arkaan dhibaatooyin caafimaad, oo ay ku jiraan:
 - dadka habdhiska difaaca jirkooda uu liito.
 - ka wayn 65 sano.
 - qaba xanuunnada ka hor-istaagaaya inay awoodaan inay dareemaan cuncunka (dhaawaca laf dhabarta, baralaatiga, iwm.) waayo waxay qaadan kartaa muddo dheer in la aqoonsado inay qabaan caabuqa.

Waa maxay astaamaha?

- Cuncun daran kaas oo:
 - aad ka dareemi doonto meesha injirtu ka qoday maqaarka.
 - la xiriira falcelinta xasaasiyada ka dhalata injirta.
 - wuxuu ka sii dari karaa habaynkii.
 - wuxuu badanaa socdaa asbuucyo kadib marka la daweeyo.
- Nabaro leh finan cas ama finan malax galeen ah kuwaas oo u muuqan kara sida fin-qooq.
- Finanka ayaa caadiyan kasoo baxa meelaha laalaabka maqaarka ah ee u dhixeeeya faraha gacmaha, faraha cagaha, cumaacumaha, suxullada, kilkilaha, araxda, bawdyaha, aaga xubnaha taranka, ubucda, iyo qalalka barida.
- Carruurta ka yar 2 sano ayay u badan tahay inay kasoo baxaan finan iyo nabaro ku yaala madaxa, qoorta, calaa-calaha gacmaha, iyo cagaha.

- Xoqista ayaa sababi karta nabaro dheeri ah oo ka soo baxa maqaarka kuwaas oo uu caabuqu ku dhici karo ama keeni kara xaalado kale, sida caabuqa impetigo.

Sidee ayey ku faaftaa?

- Injirtu waxay ka xamaaran kartaa qof ayadoo u gudbaysa qof kale. Ma duulaan ama ma boodaan.
- Si qofka uu ugu dhaco isnadaamis, maqaarkiisa ayaa u baahan inuu taabto qofka qaba isnadaamiska muddo dheer oo ku filan in injirtu ka soo xamaarato.
- Waxay sidoo kale ku faafi karta wadaagista alaabta qoyska sida dharka, shukumaannada, iyo go'yaasha lagu seexdo.

Sidee Ayaan Ku Ogaanayaa Haddii Cunugaygu Qabo Isnadaamiska?

Daryeel bixiye caafimaad ayaa caadiyan baari kara isnadaamiska asagoo dheecaan ka qaadaaya nabarka, kadib raadinaaya injirta ama ugxanta injirta oo lagu eego arag waynayo.

Haddii aad qabto su'aalo dheeraad ah ama aad ka walaacsan tahay in canugaagu qabo isnadaamiska, la xiriir daryeel-bixiyahaaga caafimaadka. Xaashidaan xogeed waxay ku siineysaa macluumaad guud oo keliya.

Kawaran Haddii Canugeygu Uu Qabo Isnadaamiska?

Isla markiiba ogeysii daryeel bixiyaha caafimaadka ee cunuggaaga ama dugsiga barbaarinta caruurta haddii canugaagu qabo isnadaamiska.

Sidee loo daaweeyaa?

- Dadka qaba isnadaamiska waa inay u tagaan daryeel bixiye caafimaad. Daryeel bixiyaha caafimaadka ayaa u qori doona kareen kadibna siinaaya tilmaamo ku aadan sida loogu isticmaalo qaab sax ah si loogu daaweeyo isnadaamiska.

Sidee ayaan gacan uga gaysan karaa kahortaga faafida isnadaamiska?

- Hadba sida ugu dhakhsaha badan ee qofka qaba isnadaamisku uu ugu tago dhakhtar uuna u bilaabo qaadashada daawada, ayay u yeraanaysaa suuragalnimada ah in isnadaamisku uu ku faafi karo dadka kale.
- Alaabta taaban kara maqaarka qofka qaba isnadaamiska xili kasta inta lagu jiro 3-da maalmood ee ka horaysa intuusan bilaabin daawada waa in la dhaqaa.
 - Dhaq go'yaasha, harqadaha barkimaha, iyo dharka taabtay maqaarka adigoo adeegsanaaya biyo kulul (130°F [54.4°C]) oo raaci biyo kuna qalaji meesha ugu kulul.
 - Alaabts aan lagu dhaqi karin mashiinka dhar-dhaqaalka waa in lagu xareeyaa bac aad loo xiray ilaa muddo 4 maalmood ah maadaama aysan injirtu ku noolaan karin banaanka dadka wax ka badan 2 ilaa 3 maalmood.

Canugeygu Ma U Baahan Yahay Inuu Iska Joogo Guriga oo uu Ka Haro Goobta Xannaanada Carruurta?

Haa. Carruurta qaba isnadaamiska ayaa u baahan inay guriga joogaan aysana aadin xarunta xannaanada carruurta. Waxay ku laaban karaan xarunta xannaanada carruurta kadib marka ay dhamaystaan qaadashada daawada.

Fadlan raac xeerarka barnaamijka xannaanada ee canugaaga.

Tixraacyada

American Academy of Pediatrics

- Managing Infectious Diseases in Child Care and Schools, 6th Edition. Page 171-172

Centers for Disease Control & Prevention

- Parasites – Scabies. https://www.cdc.gov/parasites/scabies/gen_info/faqs.html